# Bloomington. Bari Wadajir

## Kooxda Qorshaynta Istaraatiijada u qaabilsan Magaalada Bloomington

Naga caawi naqshadaynta qorshaha istaraatiijadeed ee mustaqbalka Bloomington adoo si mutadawacnimo ah ula shaqaynaaya mid kamid ah kooxahaan.

| Kooxda Bud-dhiga u ah Qorshaynta<br>30 xubnood | Kooxda Cabirka<br>8 – 15 xubnood | Kooxda Shaqada<br>30 – 90 xubnood |
|---|---|---|
| **Ujeedada kooxda**<br>Inay abuuraan hiigsiga muddada fog iyo qorshaha istaraatiijiyada ee mustaqbalka Bloomington. | **Ujeedada kooxda**<br>Inay abuuraan farsamooyinka kormeerka iyo cabirka hormarka laga sameeyo qorshaha istaraatiijiga ah. | **Ujeedada kooxda**<br>Inay dhisaan qorshaha tallaabada ka shaqaysiinta qorshaha istaraatiijiga ah. |
| **Himilooyinka Xubnaha Kooxda**<br>• Inay bixiyaan fikrado, aqoon iyo hibooyin lagu kordhinaayo hanaanka qorshaynta.<br>• Inay awoodaan meel iska dhigida masaalixda gaarka ah ayna sheegaan dareenkooda gaarka ah.<br>• Waa inay u furnaadaan fikradaha kuwa kale ayna qorshaha ku daraan tallooyinka bulshada.<br>• Waa inay awoodaan fikirkooda si ay u qiyaasaan waxyaabaha imaan kara mustaqbalka.<br>• Waa inay akhriyaan xogta tixraaca ah si ay ugu diyaar garoobaan ka qaybgalka doodaha.<br>• Waa inay la sheeyaan shaqaalaha kale si loo abuuro la iskuguna raaco nooca ugu danbeeya ee qorshaha istaraatiijiga ah.<br>• Kadib marka la dhamaystiro qorshaha, waa inay la kulmaan kooxda sanad kasta si dib u eegis iyo wax ka badan loogu sameeyo.<br>• Waa in qof kasta noqdaa ilaaliyaha qorshaha istaraatiijiyada ee bulshadooda. | **Himilooyinka Xubnaha Kooxda**<br>• Waa inay fikir iyo talo ku biiriyaan sida loo cabiraayo hormarka qorshaha istaraatiijiga ah.<br>• Inay abuuraan nidaamyo gaar ah oo lagu hubinaayo hormarka laga sameeyay dhinac kasta oo kamid ah qorshaha istaraatiijiga ah muddo kadib.<br>• Waa inay si iskaashi leh ula shaqeeyaan xubnaha koox dad ah oo kaladuwan.<br>• Khibrad uu qofku u lahaado abuurista cabirada shaqada la qabtay waa muhiim, laakiin qasab maaha. | **Himilooyinka Xubnaha Kooxda**<br>• Waa inay abuuraan liiska tallaabooyinka gaarka ah ee hal qayb oo qorshaha istaraatiijiyada kamid ah ayagoo kaashanaya shaqaalaha Magaalada.<br>• Inay doonayaan inay la shaqeeyaan dadka kale si loo gaaro heshiis.<br>• Waa inay awoodaan inay la yimaadaan agabka talaabada oo faa'iido u leh bulshada oo dhan.<br>• Aqoon iyo khibrad ay u lahaadaan qorshaynta mashruucu waa wax fiican, laakiin qasab maaha. |
| **Dadaallada**<br>• Waa inay ka qaybgalaan dib u naqshadaynta Kooxda Bud-dhiga u ah Qorsheynta<br>• Waa inay ka qaybgalaan kulamada sanadlaha ah si dib u eegis iyo wax ka badal loogu sameeyo qorshaha muddada shanta sano ah ee uu socdo | **Dadaallada**<br>• Waa inay ka qaybgalaan ugu yaraan kulanada saddex maalmood dhan | **Dadaallada**<br>• Waa inay ka qaybgalaan saddex illaa shan maalmood oo kulan ah |
| **Kulannada**<br>• Dib u eegista: Diiseembar 2 - 4, 2021<br>• Kulanka Dabagal ah: Billoowga 2022<br>• Kulannada sanadlaha ah mudada shanta sano ah | **Kulannada**<br>• Kulannada waxaa la qaban doonaa Diiseembar 2021/ Janaayo 2022 | **Kulannada**<br>• Kulannada waxaa la qaban doonaa Janaayo 2022 |

Magaalada Bloomington qofna kuma takoorto ama uma diido adeegyadeeda gunnooyinka, barnaamijyada, ama hawlaha ayadoo ku salaynaysa naafonimada qofka. Si aad u codsato hooy macquul ah, dalbo macluumaad badan, ama soo gudbi cabasho, la xariir waaxda Isku xirka iyo Iskaashiga Bulshada, Magaalada Bloomington, Magaalada Bloomington, 1800 West Old Shakopee Road, Bloomington, MN 55431- 3027; 952-563-8733, MN Relay 711.